Ilaahay ma aqbalo Salaada midkiin hadii waysadu ka jabto ilaa uu weyso qaato

Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey in Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: " Ilaahay ma aqbalo Salaada midkiin hadii waysadu ka jabto ilaa uu weyso qaato.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey shuruuda Salaadu ku ansaxayso, taasoo ay ka mid tahay Dahaaradu, sidaa darteedna ay waajib ku tahay Qofka doonaya inuu Salaad tukado inuu wayso qaato, hadii shay waysada buriya ka dhacay, sida Saxarada, Kaadida, Hurdada, iyo qayrkeed.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3534